Helidda Daynta Dhigaalka ah

Haddii aad doonaysid inaad guryaha gaarka loo leeyahay aad kireysato, badiba milkiilayaasha guryahaas waxay ku weydiin doonaan inaad bixiso lacagta dhigaalka (ama dhigaalka ammaanka dib loo bixiyo) ka hor intaadan guriga ku soo guurin. Markay dhammaato muddadii kiradaada milkiilaha gurigu wuxuu dalban karaa dhammaan ama qayb dhigaalkaagii ka mid ah ayadoo mag-dhow u ah wixii waxyeello ah ee loo gaystey guriga ama lacagta kirada aan la bixin.

Haddii aadan awoodin inaad adigu bixiso lacagta dhigaalka, waxaad heli kartaa inaad ka amaahato lacagtaas oo aan dulsaar lahayn xafiiska guri-siinta (housing office) ee degaankaaga. Taasna waxaa loo yaqaan daynta dhigaalka.

Daymahaas waxaa loogu talagalay oo keliya dhigaalka loomana isticmaali karo in lagu bixiyo kiro hore loo sii bixiyo ama kharashyada soo guuritaanka.

Xaddiga lacagta daynta dhigaalka oo dhammaystiran waa in la bixiyaa markay dhammaato muddadii kirada. Haddii milkiilaha gurigaaga uu sii haysto qayb ka mid ah dhigaalka sababtoo ah kiro aan la bixin ama waxyeello loo gaystey guriga, waxaa mar kasta lagaa doonayaa inaad bixiso daynta dhigaalka oo dhan.

Xaq-u-yeelashada

Waxaad xaq u leedahay daynta dhigaalka haddii:

- Aad fuliso xadka u yaal xaq-u-yeelashada dakhliga iyo hantida daynta dhigaalka
- Aad tahay dagane joogto ah ee Australia
- Qaybtaada lacagta kirada aysan ka badnayn boqolkiiba 55 ee dakhligaaga toddobaadlaha ah oo duuduub ah
- Aadan wada lahayn ama qayb lahayn guri, falaad ama yunid
- Aad bixisay daynta dhigaalka oo hore, iyo
- Haddii aan lagugu lahayn wax lacago ah oo la xiriira kiro hore ama mid hadda ah ee guryaha dadweynaha.

Waxaa jira waxyaalo ka baxsan xeerarkan qaarkood. Fadlan kala xiriir xafiiska guri-siinta degaankaaga wixii macluumaad dheeraad ah.

Xaddiga daynta

Xaddiga daynta aad amaahan karto wuxuu ku xiran yahay tirada qolalka ee guriga aad kireysanayso iyo tirada dadka halkaas degi doona. Xaaladaha qaarkood, qolka waxbarashada ama qadada waxaa lagu tirin karaa inuu yahay qol-jiif.

Xaddiyada daymaha dhigaalka ee ugu sarreeya waxay yihiin:

Baaxadda guriga	Daynta dhigaalka ee ugu badan	Baaxadda guriga	Daynta dhigaalka ee ugu badan
1 Qol-jiif	$1,100	3 Qol-jiif	$1,400
2 Qol-jiif	$1,400	4 Qol-jiif ama ka badan	$1,600

Waxaan ka soo saarnaa qaybta aad bixinayso isugaynta xaddiga dhigaalka una qaybina tirada dadka bixinaya kirada oo ku nool guriga. Tusaale ahaan, haddii aad kireysanayso guri afar qol-jiif ah kaas oo ay ka taal dhigaal $1,000 ah, qaybtaada daynta dhigaalka waxay noqonaysaa $250.

Codsiga daynta dhigaalka

Waxaad ka codsan kartaa xafiiskaaga guri-siinta ee kuugu dhow adigoo buuxiya codsiga daynta dhigaalka ah iyo adigoo na siiya macluumaadka aan uga baahanahay inaan ku soo-saarno haddii aad u xaq leedahay.

Adiga keliya ayaa soo codsan kara, ama labada is-qabta, ama qaybta guriga la wadaago ah. Hal foom oo dhigaalka ah ayaa loo ogol yahay halkii guri oo kiro ah.

Ha siin wax lacagta dhigaalka ah milkiilaha ama wakiilka ka hor intaanan kuu sheegin in dayntaadii la ogolaaday.

Marka laga reebo xaaladaha qaarkood, dib kuuma siin karno xaddiga lacagta dhigaalka haddii aad hore u siisay milkiilaha ama wakiilka.

Ma codsan kartid daynta dhigaalka ilaa milkiilahu ama wakiilka cammaaraddu uu ogolaado codsigaaga inaad kireysato gurigaas gaar ahaaneed. Guriga aad doonaysid inaad kireysato waa inuu ku yaallaa Victoria.

Milkiilahaaga ama wakiilkaaga waa inuu kaloo buuxiyaa qaybta codsiga Daynta Dhigaalka, si uu noogu sheego wax ku saabsan guriga aad kireysanayso. Haddii uusan milkiilahaagu isticmaalin wakiilka cammaaradda, waa inay xaqiijiyaan lahaanshahooda guriga ama ay na siiyaan ogolaansho aan sidaas anagu uga samayno degmada degaanka.

Dakhliga iyo hantida (assets)

Mid kasta oo dakhliga iyo hantida codsadaha ka mid ah waa inay waafaqdaa xadka u dhigan dakhliga iyo hantida ee xafiiska guri-siinta. Guud ahaan waxaan cusboonaysiinaa arintan lixdii biloodba mar.

Haddii adiga ama codsade uu ka qaato dhakhli Centrelink, waxaad na siin kartaa ogolaansho si aan Centrelink uga xaqiijino dakhligaaga, hantidaada, iyo macluumad kale, anagoo isticmaalayna **Adeegga Xaqiijina Dakhliga** (Income Confirmation Service). Haddii aad isticmaasho Adeegga Xaqiijina Dakhliga, uma baahnid inaad na siiso dokumantiyada dakhliga iyo hantida, hase ahaatee wali waa inaad na siisaa dokumantiyada khuseeya wixii hanti guri aad leedahay.

Haddii adiga ama codsade uusan isticmaalin Adeegga Xaqiijina Dakhliga, waa inaad na siisaa dokumantiyada si loo caddeeyo dakhliga codsade kasta. Tan waxay noqon kartaa warqad hadda ah (wax ku siman laba toddobaad) oo ka socota **Centrelink** ama **Veterans Affairs**, caddaynta mushaarka ee loo-shaqeeyahaaga, ama Caddaynta Faai'dada iyo Khasaaraha oo 13 toddobaad ah haddii aad tahay qof iskiis u shaqaysta.

Waa inaad kaloo na siisaa dokumantiyo si loo caddeeyo hantida codsadaha, oo ay ka mid yihiin hantida guriga aad leedahay.

Caddaynta dakhliga iyo deganaanshaha

Waa inaad na siisaa caddaynta aqoonsiga codsade kasta. Tani waxay noqon kartaa hal foom oo aqoonsi oo wata sawirka iyo saxiixa (tusaale ahaan, baasaboor ama laysanka darawalnimada) ama dokumantiyada aqoonsiga ee kale ee qof kasta laga doonayo (tusaale ahaan Medicare card, Health care card, warqadda dhalashada).

Waa inaad kaloo keentaa caddaynta dagananshaha ee xubin kasta oo qoyska ah oo aan ku dhalan Australia (tusaale ahaan, shahaadada muwaadinimada Australia, fiiso, baasaboor, ama warqad ka socota Wasaaradda Department of Immigration and Citizenship).

Helidda daynta

Haddii codsigaaga la ogolaado, jeeg ay ku qoran tahay Residential Tenancies Bond Authority ayaa lagu siin doonaa ama waxaa toos loogu diri doonaa milkiilahaaga ama wakiiladooda. Jeegga waxaa la socon doona foomka Xaraynta Dhigaalka, kaas oo milkiiluhu u isticmaali doono si uu lacagta dhigaalka uga codsado Residential Tenancies Bond Authority.

Dib-u-bixinta daynta

Markay dhammaato muddadii kiradaadu milkiilahaaga ama wakiilkaaga ayaa ka codsan doona Residential Tenancies Bond Authority si lacagtii dhigaalka dib loogu siiyo Xafiiska Guri-siinta. Haddii milkiilahaagu haysto qaar ka mid ah lacagta dhigaalka sababtoo ah kiro aan la bixin ama waxyeellooyin loo gaystey guriga, waxaa lagaaga baahan yahay inaad bixiso qaybtaadii daynta.

Wixii murano ah oo u dhaxeeya adiga iyo milkiilahaaga oo ku saabsan kiro aan la bixin ama waxyeellooyin loo gaystey guriga, waa inay go'aan ka gaartaa Maxkamadda Victorian Civil and Administrative Tribunal.

Xubin kasta oo ka mid ah qoyskaaga oo codsanaysa Daynta Dhigaalka waa inay saxiixdaa heshiis in la bixiyo daynta iyo ka qayb-gelidda dacwooyinka sharciyeed ee soo-celinta lacagtii dhigaalka.

Macluumaad dheeraad ah

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan helidda Daynta Dhigaalka, la xiriir xafiiska guri-siinta degaankaaga, (kuwaas oo ku qoran White Pages meesha ka hoosaysa 'Human Services, Department of'). Macluumaadkan waxaa kaloo laga heli karaa www.housing.vic.gov.au